

# FEMA waxay cusboonaysiisaa

## Barnaamijka Caawinta Qofka

Release Date: Mar 22, 2024

FEMA waxay dhaqan galisay cusboonaysiinta ugu muhiimsan ee gargaarka musiibada 20 kii sano ee la soo dhaafay. Cusboonaysiintani waxay khusaysaa masiibooyinka uu Madaxweynuhu ku dhawaaqay March 22, 2024 ama ka dib waxaana ka mid ah:

### Faa'iidooyinka Cusub:

- **Caawinta Baahiyaha Daran**

Lacag kaa caawinaysa inaad ku bixiso alaabta muhiimka ah sida cuntada, biyaha, caanaha ilmaha, dawooyinka, iyo sahayda kale ee degdega ah.

- **Gargaarka Barakaca**

Lacag lagu caawinayo baahida guriyeenta degdega ah haddii aadan ku noqon karin gurigaaga sabab laxariirta masiibada darteed. Lacagta waxaa loo isticmaali karaa in hudheel lagu dago, qoyska iyo asxaabta, ama waxyaabaha kale inta aad raadinayso guri kiro ah.

### Balaadhinta Xaq u yeelashada:

- **Caawinta Baahiyaha Kale ee La Fududeeyay**

Milkiilayaasha guryaha, kiraystayaasha iyo ganacsatada kuwaas oo u baahan caawimo dheeraad ah si ay u soo kabtaan waxay codsan karaan amaahda masiibada ee dulsaarka yar gi [U.S. Small Business Administration](#) isla mar ahaantaana ka codsanaya kaalmada FEMA.

- **Caawi Dadka Aan Caymiska ku jirin**

Haddii aad heshay lacag-bixin caymis ah oo aan daboolin kharashka burburka gurigaaga ama hantidaada, waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto inaad lacag ka hesho FEMA. Wuxaad maskaxda kuhaysaa, gargaarka FEMA maaha beddelka guriga, kiraystayaasha, ama caymiska daadka, mana dabooli doono dhammaan khasaaraha ka dhashay musiibada.



**FEMA**

Page 1 of 2

#### **▪ Shuruudaha la badiyay ee Caawinta Dayactirka Guriga**

Waxa laga yaabaa inaad hesho lacag aad ku dayactirto qaybaha gurigaaga ee ay masiibadu waxyelaysay iyadoon loo eegin xaalado hore u jiray. Waxa kale oo aad samayn kartaa dib-u-hagaajin ka hortagaya waxyelo la mid ah masiibooyinka mustaqbalka imaan karo.

#### **▪ Hagaaji Horumarinta Helitaanka**

Lacag kaa caawinaysa in aad gurigaaga ku samayso dayactir la geli karo (sida bannaanka sare, baararka qabsashada, iyo dariiqa laami ee albaabka guriga) haddii aad naafo tahay. Dayactirka waxaa la samayn karaa marka alaabtan ay waxyelo soo gaarto inta lagu jiro musiibo. Hagaajinta guriga waxa la samayn karaa marka sifooyinkani aanay joogin musiibada ka hor laakiin loo baahan yahay naafo hore u jirtay ama naafanimada ay sababtay masiibada.

#### **▪ Kaalmada la Fududeeyay ee Codsadayaasha Iskood u Shaqeeya**

Haddii aad iskaa u shaqeysato, FEMA waxa laga yaabaa inay ku bixiso lacag aad ku dayactirto ama aad ku beddesho qalabka iyo qalabka ay musiibadu waxyelaysay ee loo baahan yahay in lagu qabto shaqadaada.

#### **▪ Caawinta Balaadhan ee Qalabka Xisaabinta**

Waxa laga yaabaa inaad hadda lacag ku hesho kombuyuutar shakhsii ama qoys oo ay masiibo dhaawacday. Waxa kale oo laga yaabaa inaad lacag ku hesho kombiyuutarada dheeraadka ah ee looga baahan yahay shaqada, dugsiga ama helitaanka iyo baahiyaha shaqada.

### **Habka Codsiga La Fududeeyay:**

#### **▪ Codsiyada Kaalmada Guriyeenta Ku Meel Gaarka ah ee La Fududeeyay**

Shuruudaha dukumeentiga oo la dhimay haddii aad raadinayso kaalmada guriyeenta ku meel gaarka ah oo sii socota. Shakhsiyaadka kiiska ayaa si dhow kula xiriiri doona si ay u kugu taageeraan oo ay u kordhiyaan daahfurnaanta.

#### **▪ Caqabadaha laga saaray Codsadayaashii Dambe**

Haddii aad codsanayso ogolaansho codsi daahay, uma baahnid inaad keento dukumeenti taageeraya sababta codsigaada uu udaahay.

#### **▪ Fududeeya Habka Racfaanka**

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka FEMA oo aad rabto inaad rafcaan ka qaadato, uma baahnid inaad keento warqad rafcaan oo qoran oo saxeexan si aad ula socoto dokumentiga cadaynta ah.



**FEMA**

Page 2 of 2